

Waraabowga

(waxaa sababa *Treponema pallidum*, ilmaqabato)

CALAAMADAHA IYO SAANSAANTA XANUUNKA

Heerka 1aad (waraabowga heerka hore)

- Xanuunada bukaanka waxay bilawdaan toddobaadyada 1-12 ee xiga marka la qaado
- **Xanuun lahayn**, nabar(nabro) afka, guska, siilka ama dabada ka soo baxa
- Nabarka(nabraha) waxay ku “dhuuman” karaan saxaaxa ama malawadka
- Nabarka(nabraha) waxay sii jiri doonaan 1-5 toddobaad
- Xanuunka(xanuunada) way is ka tagi karaa, laakiin waraabowga dhiiga ayuu ku jirayaa

Heerka 2aad(waraabowga heerka labaad)

- Saansaanta xanuunka waxay soo baxayaan 6 toddobaad illaa 6 bilood kaddib marka ay nabraha muuqdaan
- Nabaro jirka oo dhan ka soo baxa
- Xanuunada bukaanka oo durayga oo kale la mida
- Cad cad-dambas oo afka/bishimaha ka soo baxa, agagaarka saxaaxa xonqoro nabro u eg ka soo baxa, iyo/ama timaha oo bida waa ay dhici karaan laakin waa ku yar yihiin

Heer Dambe

- Meel xanuunaya ama cuncunaya ma laha, waraabowga waxuu weli ku jira jirka waxuuna wax u dhimi karaa wadanaha, maskaxda iyo xibnaha kale muddo ka bacdi (isfililatada heerka saddeexaad)

ISQAADSIINTA

Waraabowga waxaa laysku qaadsiiyaa:

- Galmada siilka
- Galmada afka
- Galmada dabada
- Hooyada caabuqan ee ilmaha dhashay qaadsiiisa

CILLADAHA

Haddii aan la daawayn, waraabowga waxay noqon kartaa:

- Mid dadka lala galmoodo la qaadsiiyo
- Wadna xanuun la qaado
- Indha beel laga qaado
- Maskaxda sababta iney wax u dhinto
- Fududaysa is qaadsiiinta ama gudbinta HIV marka la galmoonayo

Xiliga uurka waraabowgu wuxuu keeni kartaa:

- Ilmuhu inay uurka hooyada ku dilmaan
- Cillad ilmuhu ku dhasho
- Dhibaatooyin xun ay lafaha, maskaxda, sambabada, beerka gaaraan iyo xubno kale ee ilmaha caabuqan ku dhacaan

KA HORTAGISTA

- Laga fogaado galmada saxaax, afka, dabada waa si uga wanaagsan ee STDs looga hortagayo.
- Komdomka caagga ah, marka sidii loogu talagalay iyo sida saxda ah loo isticmaalo, waxa uu yarayn karaa halista isfiilitada keliya marka meesha caabuqan komdom lagu daboolo ama lagu difaaco.
- Komdomka caaga markasta la isticmaalo marka galmada siilka ama dabada la samaynayo.
- Komdomka caagga guska lagu xirto u isticmaal galmada afka.
- Caag ku difaacayo (wax ilkaha difaaca ama komdom dhaxda laga gooyay) galmada afka, siilka ama dabada loo isticmaalo.
- La yareeyo dadka lala galmoodo.
- Dadka lala galmoodo lala socodsiiyo sida ugu dhaqso badan haddii aad caabuqdo.
- Dadka lala galmoodo ee caabuqan waan in la daaweeyo.

BAARITAANKA IYO DAAWAYNTA

- Baaritaan shaqaalaha caafimaad haa qaado haddii caabuq la tuhmo.
- Syphilis waxaa lagu daawayn karaa ayadoo daawada uu shaqaalaha caafimaad soo qoray la qaato.
- Dadka lala galmoodana waa in isla markaa ayagana la daaweeyo.

Ogow: Qofka laga daaweeyay markale ayuu cudurka qaadi karaa.

MACLUUMAAD DHEERAADA, LA XARIIR:

Minnesota Department of Health
STD and HIV Section
(Waaxda Caafimaadka Minnesota)
(Qaybta STD iyo HIV)
(651) 201-5414
www.health.state.mn.us/std

Minnesota Family Planning and STD Hotline
(Qorshaynta Qoyska Minnesota iyo Khadka STD)
1-800-783-2287 Codka/TTY;
(651) 645-9360 (Magaalada iyo Degaanada)
www.sexualhealthmn.org

American Social Health Association (ASHA)
(Iskaashtada Caafimaadka Bulshada American ka - ASHA)
www.ashastd.org

CDC National STD and AIDS Hotlines
(CDC National STD iyo Khadka AIDS ka)
1-800-CDC-INFO; 1-888-232-6348 TTY
www.cdc.gov/std